

Khidmadaha (Fares)

Hal marin	\$1.25
Bas ku raac (10 jeer)	\$11.00
Bas raac dhalinyaro (da'5-17)	\$7.00
Carruurta (ka yar 5 sano)	BILAASH

Fadlan khidmadda oo go'an gacanta ku hayso markaad baska raacayso. Wadaha basku baaqi kuuma celin karo.

Bas ku raaca waxaa laga gadan karaa wadaha baska magaalada Faribault ama Dawlada Hoose Faribault Xafiiskeeda horumarinta bulshada, dabaqada saddexaad ee D/Hoose (City Hall), 208 1st Avenue NW.

Bas ku raaca dhalinyarada ayaa la heli karaa sannadka oo idil saddex jeer:

- Jannayo 1 – Memorial Day,
- Memorial Day – Labor Day, and
- Labor Day – Dseember 31

Bas ku raaca dhalinyarada ayaa laga gadan karaa Buckham Library, Xruunta bulshada (Community Center), Xafiiska Horumarinta Bulshada (Community Development office) iyo wadaha baska, .

Jadwalka baska Schedule Information

Jadwallada basaska ayaa laga heli karaa Dawladda Hoose (City Hall), Buckham Center, iyo baska dushiisaba. Si aad u hesho marin/khad iyo macluumaadka jadwalka, fadlan wac **339-1781** ama **334-0100** ama www.ci.faribault.mn.us.

Saadaha Shaqada Hours of Service

Isniin - Jimce.... 6:30 aroor. – 6:30 fiid.
Sabtida7:30 aroor. – 4:30 galab.
Axad8:30 aroor. – 3:30galab.

Basasku ma shaqaynayaan faystooyinka soo socda: New Year's Day, Easter Sunday, Memorial Day, 4th of July, Labor Day, Thanksgiving Day, and Christmas Day.

Faribault Flyer ma shaqaynayo haddii xaaladda wadadu ayan ammaan ahaynwill . fadlan ka dhegeyso idaacadda KDHL, 920 AM, ogeysiisyada cimilada la xiriira.

Adeega khadka ka baxsan Off Route Service

Faribault Flyer ayaa leh marin/khad loo abuuray inuu una adeega meelaha waaweyn ee masaafooyinka caanka ah Faribault. Si kastaba arrintu ha ahaatee, haddii aad ku nooshahay in ka fog 4 baloog marinka la cayimay, ama aad ku dhib qabto socodka masaafadaasi, adeeg ka baxsan marinka ayaad heli kartaa. Waxaad soo wici kartaa wadaha baska inuu kaa qaado goob is-goys deriskaaga ah. Adeeg min irrid ilaa irrid ayaa loo samaynayaa haddii ay ku habboon tahay xeerka Maraykanka Naafada Qaba (Americans with Disabilities Act). Wadaha baska ayaa kuu sheegaya waqtiga ugu horreeya ee la heli karo iyo goobta lagaa qaadayo

Codsiyada marinada/khadka ka baxsan ayaa loo jadwalaynayaa iyadoo ku salaysan sida loo soo hor kala wactamay (on a first call-first served basis). Waxaa lagugula talinayaa in boos celis/qabsi aad samaysato 24 saacadood ka hor, balse ogeysiis labo saacadood ayaa lagaaga baahan yahay. Boos celiska/qabsiga (Reservations) ayaa looga baahan yahay goob kasta een ku jirin marinka/khadka, haba ka mid noqoto bas ku soo laabashada . Boos qabsiga ayaa la samaysan karaa beri ka hor.

Labo weecasho ayaa lagu tala geli karaa nusa saace kasta ee marinka/khadka saacdda qaadanaya, marka laga reebo 7:30-9:30 gelinka hore iyo 1:00-4:00 galinka dambe marka boos-celin hore loo samaystay ay weli jirto. Leexasho

ama weecasho dheeraad ah lama samayn karo saacadahaasi. Wadaha/shufeerka ayaa ka bixinaya talo waqti kale ee la qaado haddii aan waqtiga la qabsaday suuragal ahayn.

Baajinta/Nidaamka Maqnaansho Cancellations/No Show Policy:

Dhigaal/boos qabsiga (reservations) waa in a baajiy ugu yaraan labo saacadood ka hor waqtiga jadwalka soo qaadista. Maqnaansho/imatin la'aan 'no show' wuxuu dhacayaa marka qofku ka baaqdo waqtiga isaga/iyada la qaadi ahaa ama aanu bixin ogeysiiska baajinta. Haddii qofi uu saddex jeer baaqdo muddo 30 beri gudahood ah, adeegga ayaa loo diidayaa muddo labo asbuuc ah..

Tas-hiilaadka Naafada Handicap Accessibility

Basja waxaa lagu qalabeeyey wiishka qaada kursiga naafada. Ogeysiin 24 saac gudahooda ayaa lagu dhiirrigalinayaa rakaab kasta ee u baahan isticmaalka wiishka, maadaama boosku kooban yahay. Tas-hiilaadka Adeegyada Dhagoolayaasha (TTD) ayaad heli kartaa haddii aad wacdo Lam. 333-0397.

Asluubta Rakaabka Passenger Behavior

Rakaabka ayaa laga filayaa inay asluubtooda iyo anshaxoodaba hagaajiyaan, isla markaasna muujiyaan xaq-dhawr dadka kale. Cunidda, cabidda iyo sigaar dhuuqidda ayaa mamnuuc ah, sidoo kale haysashada maan-dooriyeyaasha iyo hubka iyo aalkolo daasad/qarsho furan ku jirta.

Dabeecadha aan habboonayn waxaa ka mid ah, balse ku koobnayn, luqad waxyeello leh, rabshayn ama la dagaalid rakaabka kale. Haddii wadaha baabuurku dareemo in rakaab dhaqankiisu habboonayn, rakaabka waxaa la weydinayaa inuu joojiyo. Haddii anshax xumadu sii socota, rakaabka waxaa la weydiinayaa inuu

baska ka dego. Haddii loo baahdo, booliiska ayaa la wacayaa si loo dejiyo rakaabka.

Faribault Flyer ayey u gaar tahay xuquuqda ay ku diidi karaan adeeg ku salaysan ku xad-gudub heer-naqdiga sare.

Caawinaadda Rakaabka Passenger Assistance

Rakaabka ayaa loo oggol yahay labo boors qaadasho. Waduhu ku caawini mayo rakaabka boorsooyinka iyo alaabtooda. Rakaabka ayaa mas'uul ka ah xafidashada alaabta ay sitaan ama waxyaabaha ay leeyihiin (ayna ka mid yihiin gaariyada ilmaha lagu qaado) hubiyana in kuraasta dhexdooda iyo goobta gaariga lugaha leh ee naafada aan la xayirin. Faribault Flyer mas'uul kama ah shayada baska looga tago ama wax gaareen, ayna ugu wacan tahay rakaabka oo ku guul darraystay inuu alaabadiisa xafito.

Wadaha/shufeerka ayaa caawinaya rakaabka u baahan in lagu caawiyo wiishka. Wiisha ayaa loo isticmaali karaa gaariga lugaha leh iyo dadka bukaanka ah oo aan ku lugayn Karin jaran jarrada baska. Rakaabka aan awoodin inay keligood soo koraan, kana degaan gaadiidku waa inay wataan qof daryeele ah ee weheliya ama la jooga si ay u caawiyaan.

Wadaha/shufeerka iyo garashadiisa/garashadeeda ayuu/ayey caawini kara/ kartaa rakaab tabar ama tag daran xaaladaha cimilada daran.

Lambarrada telefoonada Muhiimka ah Important Phone Numbers

Macluumadka Jadwalka 339-1781
ama 334-0100

Adeegga Dhega-culayska 333-0397

Hearing impaired Services

Adeegyada khadka ka baxsan
Off route service 339-1781

Nuqul Nidaamka Adeegyada oo dhammaystiran ayaa kuu diyaar ah haddii aad kala xiriirto Kim Lang. Xiriiriyaha Horumarinta Bulshada (Community Development Coordinator), lam 507-333-0376 ama farriin ugu diraya klang@ci.faribault.mn.us



JADWALKA BASKA (Bus Schedule)

Effective June, 2010

City of Faribault
208 1st Avenue NW
Faribault, MN 55021
507-334-2222
www.ci.faribault.mn.us